FAAFINTA RASMIGA :

الرسمية الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 9-aad. Garowe 15. August. 2007 Lam. 8

Faafinta bil walba soo baxda جريدةالشهرية

*__Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland__*

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA

__Qeybta Koowaad__

__Sharci__

__Qeybta labaad__

__Xeer__

__Waxba ma leh__

__Qeybta Saddexaad__

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

*Sharci Lr. 11. ee 11/08/2007, kuna saabsan Qaanuunka Siyaasada Macalimiinta Waxbarashada ee Puntland.* Boga 144–154

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Xafiiska Madaxweynaha**

**Office of the President**

---

**Sharci Lr.11 ee 11/08/2007, kuna saabsan Sharciga Siyaasada Macalimiinta Waxbarashada Puntlnd.**

Madaxweynuhu

| | | |
|---|---|---|
| Markuu arkay | : | Dastuurka DGPL qodobkiisa 54-aad faqradiisa 14-aad. |
| Markuu arkay | : | Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/083/2007 ee 08/07/2007. |
| Markuu Garowsaday | : | Ansixinta Sharcigan ee Golaha Wakiilada. |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen sida kor ku cad qaanuunka Siyaasada Macalimiinta Waxbarashada ee Puntland.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah waa la kaydinayaa..

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu qaanuunkani faafinta rasmiga ah ee dawlada ku soo baxay, kaasoo kamid noqonaya qawaaniinta Dawlada, cidkastana waa jib ayey ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabilaahi Towfiiq**

**Mudane Maxmuud Muuse Xirsi**

**Madaxweynaha Dowlada**

144

DAWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

Golaha Wakiillada

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Representative Council

**Xafiiska Guddoomiyaha**

---

*Ref:-* XGGW/DGPL/ 83 /2007 — **08/07/2007**

Ku:- Madaxweynaha DGPL — Garoowe

Ujeeddo:- **Ansixinta Siyaasadda Macallimiinta Waxbarashadda ee P/land**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DGPL |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Golaha Xukuumadda ee Siyaasadda Macallimiinta Waxbarashadda ee P/land |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahidda loo qabo Siyaasadda Macallimiinta Waxbarashadda ee P/land |
| MARKUU DHEGEYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada DGPL |
| MARKUU ARKAY:- | Ansixinta Golaha Wakiillada DGPL |

**Wuxuu Guddoomiyey:-**

Ansixinta Siyaasadda Macallimiinta Waxbarashadda ee Puntland

**Wabillaahi Towfiiq**

**Axmed Cali Xaashi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DGPL**

GOLAHA WAKIILADDA DGPL
PUNTLAND
PUNTLAND REPRESENTATIVE COUNCIL

*Dawlad Goboleedka Buntland*

Wasaaradda Waxbarashada

Xafiiska Wasiirka

حكومة ولاية بونت لاند الصومالية

وزارة التربية والتعليم

مكتب الوزير

# Siyaasadda Waxbarashada Macallimiinta ee Buntland

**Nuqulka u dambeeya**

**Waxaa oggolaaday:**
**Wasiirka Waxbarashada**
**DGPL ee Somaaliya**
**June 2006**

## Bandhiga Sababaha loo Dejinayo Siyaasadda Waxbarashada Macallinka

Ma jirto maaddo uga waxtar badan waxbarashada baraaraha gudaha iyo dibedda. Mana jirto dhinacyada waxbarashada dhinac ka waxtar badan barista (teaching).

Waxaa jira waxyaalo lagama maarmaan ka dhigaya inaan falanqayno hannaankeena waxbarashada, dibna u bilowno siyaasado wax ku ool ah, si wanaagsana aan u fariisinno goobo abaabulan ee waxbarasho (educational institutions), si aan u tayayno wax soo saarka waxbarashada:

- Hannaan waxbarasho ee wanaagsan oo ah mid la jaan qaadi kara baahiyaha isbedbedelaya, wuxuu lama huraan u yahay horumarka bulshada iyo dhaqaalaha; helitaanka hannaankaas oo kale iyo macallimiin farsamadoodu sarreyso waa mid baahida aynu u qabnaa maanta ka weyn tahay wixii ka horreeyey;
- Haddii aynu waxbarashada ka rabno inaynu ku hormarro dad iyo dalba, waa inaynu dib u fiirinaa yoolalka iyo heer beegayaasha ay leedahay (standards) iyadoo aan u eegayno baahiyaha maanta jira iyo kuwa soo muuqda, taasoo laga maarmaan ka dhigaysa inaynu dib u habayno manhajka iyo hanaanka waxbarista labadaba.
- Qaabab waxbaris ee ka ballaaran kuwii hore ayaa loo baahan yahay si aynu uga kobcino ardayda dhinacyada hal abuurka iyo malamalaynta (imagination), furfuridda dhibaatooyinka iyo go'aan qaadashada,kartidooda wada shaqaynta koox ahaaneed iyo abaabul, la qabsashada, iyadoo isla markaana ilaalinaysa farsamooyinka dhaqanka ee dhinacyada afka iyo tiraynta;
- Kuwaasi waxay raadad maldahan ku leeyihiin qaababka iyo isu dheellitirka ku xeel dheerayaasha maadooyinka iyo xirfadaha kale ee xooggaga waxbarista iyo hanaanaha ay macallimiintu u gutaan shaqadooda, waana inay ka muuqdaan abaabulada waxbarashada (institutions) iyo nuxurka lagu tababarayo macallimiinta cusub iyo weliba waxqabashada macallimiinta horayba shaqada ugu jirtey;
- Tayada waxbarashada waxaa udub dhexaad u ah tayada waxbarista iyo sidaa awgeed tayada macallimiinta. Haddaba waxaa laga yaabaa inaan isweydiino: Qaabka uu imminka uga hawlgalo macallinku fasalka guihiisa ma ku habboon yahay ujeeddooyinka maanta? Habka iyo nuxurka imminka jira oo aan ku tababarayno macallimiinta ma ku haboon yahay isna ujeeddooyinka maanta? Waxaynu dhammaanteen isku raacsanahay inaysan ku haboonayn, dib u shaandhayn buuxdana ay lagama maarmaan tahay.

Dhinaca kale, hannaankeena waxbarasho ee imminka jira waxaa ku dheehan qaabab iyo tabo hore oo gaboobey, hab raacyo shaqo qorid, magdhaw iyo aqoonsi aan wax lug ah ku lahayn waxbarista wanaagsan, muddadii 50 ka sano ahayd ee u dambeysey. Sanadihii xigey markii dawladii hore dhacday, hanaankeena waxbarasho wuxuu gaarey bartii ugu hooseysey iyadoo ay ugu wacan tahay maqnaanshaha cid xil ka saran yahay maxaa yeelay ma jirin dawlad shaqaynaysa. Si kastaba ha ahaatee wixii ka dambeeyey dhisidii dawlad goboleedka Puntland dib u eegid iyo dib u shaandhayn hanaanka waxbarashadeena ayaa loo baahan yahay, sidaa darteedna tabo cusub oo lagu furfuro isku taagayaasha (challenges) maanta jira ayaa iyana loo baahan yahay.

Ugu dambayn, yoolalka siyaasadda waxbarashada Buntland waxay qayb ka yihiin, xiriiro badanna la leeyihiin kuwa tibaaxa horumarka ummadda Buntland, sidaa darteed dejinta siyaasada waxbarashada macallimiinta ee Buntland waxay astaynaysaa tallaabooyin iskood u jiri kara oo lagu horumariyo tayadeena waxbarashada, isla markaana u adeegta yoolasha ummadda Buntland.

## Ujeeddooyinka Siyaasadda Waxbarashada Macallimiinta ee Buntland

- Dib u eegid yoolalka waxbarashada iyo heer beegayaasha (standards) iyo ugu dambayn manhajka, iyadoo ay ku jirto dhammaan tabaha waxbarista loo adeegsado, iyo in la hubiyo wax ka qabashada baahiyaha soo ifbaxaya ee qof ahaaneed, bulsho ahaaneed iyo dhaqaale ahaaned intaba;
- In loo bilaabo macallimiinta tababar ka-hor shaqada iyo mid shaqada-dhexdeeda si loogu hubeeyo wax ka qabashada arrimahaas.
- Waxbarashada macallimiinta oo la siiyo habayn jihaysan oo dheeraad ah, bandhigidda heer beegyada tayada iyo hubinta tayada, iyo wax ka beddelidda qaababka maal raadinta.
- In sare loo qaado magaca shaqada macallinimada.

### A) Hannaanka tababarka macallimiinta Buntland oo kooban marka laga eego dhanka shaqo gelinta

#### 1. Shuruudaha laga doonayo macallinka xanaanada carruurta

Macallinka xannaanada carruurta (oo ku hawlan carruur da'doodu u dhexayso 3 ilaa 6 sano)

- Waa inay/inuu leedahay/leeyahay shahaado tababarnimo xannaanada carruurta ah oo heer kulliyad 2 sano ah.

**2. Shuruudaha laga doonayo macallinka waxbarashada gundhigga (asaasiga) ah**

Macallinka waxbarashada gundhigga (asaasiga) ah [ waxbarashada tooska ah iyo tan dadban labadaba)

- Waa inuu/inay haysto/haysato shahaado u qalanta oo uu/ay ku helay/heshay tababar macallinimo heer kulliyadeed ah oo dhan laba sano.

**3. Shuruudaha laga doonayo macallinka dugsiyada sare ee caadiga ah iyo kuwa xirfadaha sare lagu barto**

Macallinka heerarka sare ee waxbarashada guud iyo tababarada farsamada sare

- Waa inuu/inay haysto/haysato shahaado u qalanta oo uu/ay ku helay/heshay tababar macallinimo heer kulliyadeed ama jaamicadeed oo dhan 4 sano.

**B) Shuruudaha lagu geli karo barnaamijka tababarka macallinimada**

- Waa inuu/inay dhammaystirtay/dhammaystiratay waxbarshada dugsiga sare isla makaana ku gudbey/gudubtey ugu yaraan darajada C.
- Haatan macallimiinta aan tababarnayn ee shaqada wada waxay xaq u leeyihiin in ka qayb galaan barnaamijka SCOTT ee sida gaarka ah loogu talogalay haddii/hadday ugu yaraan uu shaqo ku jirey/jirtey sannad dugsiyeedka 2005/2006.

**C) Mudnaanta siyaasadda waxbarashada ee la xiriirta horumarinta tababarada macallinka iyo tababarka shaqada dhexdeeda**

1. Horumarinta xirfadaha waxbarista macallinka marka lagu jiro tababarka ugu horeeya.
    - Joogitaan dheeraad ah ee aragtida waxbarashada, cilmiga barashada nafta, tabaha waxbarista iyo layliga waxbarista ayaa lagama maarmaan u ah baahida u qalanka tababar macallinimo.
    - Qabanqaabinta deeq dheeraad ah oo loogu talo galo layliga tababarada.
    - Casriyeynta tababarada macallinka (ujeeddooyinka, abuurida qaab guud ee diboloomka, shahaadada jaamicadeed ee macallimiinta dugsiyada gundhiga (asaasiga ) ah iyo kuwa dugsiga sare labadaba.

2. Kor u qaadida horumarka kartida macallinka- ugu horayn waxbarashadoda oo sii socota iyo tababaro shaqada dhexdeeda oo la aqoonsan yahay.
   - Ku bixinta barnaamijyada tababarada shaqada ka hor, afka ingriiska.
   - Barista teknoolijiyada xiriirka wararka ( ICT)
   - Maamulka
   - Ka hor tagga maandooriyayaasha, waxbarashada dhinca caafimaadka

**D) Abaabulada Waxbarasho ee ka Jira Buntland**

Waxaa ilaa iyo imminka ka jira Buntland laba kulliyadood oo lagu tababaro macallimiinta:

1. Kulliyada waxbarashada macallimiinta Garowe (GTEC):

   - Waxay ku taal Garoowe
   - Dhaqaale ahaan waxaa gacanta ku haya SIDA iyadoo u soo marinaysa DS.
   - Nooca tababarka: Barnaamijka tababarka macallimiinta dugsiyada gundhiga (asaasiga) ah
   - Ardayda ilaa hadda wax ka barata: Gabadhaha 23, Wiilashuna 44

2. Kulliyada waxbarashada ee jaamicadda bariga Africa (EAU)

   - Waxay ku taal Bossaso
   - Waxaa gacanta ku haya bulshada
   - Nooca tababarada: barnaamijyada tababarada macallimiinta dugsiyada gundhiga iyo kuwa sare labadaba
   - Ardayda ilaa hadda wax ka barata: Gabdhaha 4, Wiilashana 41

Dawladdu waxay aad u danaynaysaa inay saamayn ku yeelato is qoridda gabdhaha ee kulliyadaha aan soo xusnay si ay u kordhiso tirada macallimiinta gabdhaha ee dugsiyada Buntland. Waxayna middaas u adeegsanaysaa iyadoo u ololaynaysa inay muujiso xuquuqda siman ee ragga iyo dumarka iyo qaban qaabinta deeqo waxbarasho.

Dawladdu waxaa kale oo ka go'an sida ay u heli lahayd maalgelin lagu dhiso abaabulo dheeraad ah (institutions) ka qayb qaata tababarka waxbarashada macallimiinta ee gobolada aysan ka jirin, si ay u daboosho baahida ardayda ku soo badanaysa dugsiyada Buntland sannad walba iyo weliba inay hubiso tayada tababarada ka socda kulliyadaha ka jira degaanada Buntland.

**E) Qaabka fulinta Siyaasadda Waxbarashada**

## Manhajka tababarka macallimiinta gundhigga (asaasiga) ah

Waxaan u baahanahay macallimiin kartidooda dhinca qaababka waxbarista iyo aqoonta maaddaduba aad u sarrayso. Tababaridda macallimiinta dhincyada qaababka waxbarista, aqoontooda maadada iyo carbiskooda fasalka dhexdiisa waxay raad weyn ku yeelanayaan kartida macallinka guud ahaan ee waxbarista.

Markaan ka hadlayno manhajka, waxaan tilmaamaynaa nuxur u qalma diyaarinta macallin wax gudbin kara taasoo saldhig u ah manhajka macallinka ee loo dejiyey abaabulka waxbarasho (institutions) ee hawshaas qabanaya. Koorsooyin gundhig u ah aragtiyada waxbarashada, cilmiga barashada nafta (psychology), iyo hababka gudbinta ( aragti iyo carbisba) waa mid lama huraan u ah barnaamij kasta ee tababar macallinimo oo la qabanayo.

Kartida macallinmada waxaa dhinac ahaan lagu qaabeeyaa kulliyada tababarka gudeheeda , dhinaca kalena waa ku carbiska waxbarista (practice) iyadoo la adeegsanayo dugsi ka baxsan oo dibedda ku yaal. Barnaamij kasta ee tababar, xubinta carbiska waxbaristu , waxaa ka mid ah iyadoo koox koox uu hagayo la taliye ay booqato fasal oo mid mid waxbaris loo bilaabo.Waxaa arritaas lagu qabanayaa dugsi ay maamusho wasaaradda waxbarashadu, ayna xiriirinayso kulliyada waxabarashada hawsha wadda. Ku carbiska waxbarista waxaa lagu soo gabagabaynayaa xisad waxbaris ah oo kama dambays ah, laguna qiimaynayo darajo. Ku guulaysiga xisadaas kama dambaysta ee waxbarista ayaa shardi u ah in loo oggolaado ka qaybgalka imtixaanka ugu dambeeya. Wixii intaas ka soo hara oo lagama maarmaan u ah u qalmidda macallinimada waxay ku xiran tahay hadba barnaamijka tababarka jira, iyadoo la dhawrayo gaarnimada maadada la baranayo.

Muddada barnaamijka tababarku waa 2 sano. Qaybaha kale ee lagama maarmaanka u ah waxbarashada macallinku waa:-

- Tirada saacadaha waxbarashada tooska ah waa 32x16x4
- Koorsooyinka tababarku waa dhamaan maadooyinka dugsiyada lagu barto (Xisaab, Saynis, Cilmiga Bulshada/Barbaarinta Wadaniyadda (civics),Jir dhiska (P.E),Ingriis, Carabi, Somali iyo Barbaarinta diinta Islaamka, Fan iyo Farshaxan, Kombiyuutar iyo Waxbarasho
- Qiimayn, imtixaano iyo kormeerid joogto ah ayaa lama huraan ah inta uu socdo barnaamijka tababarku.
- Waxaa lagama maarmaan ah in la mideeyo dhamaam barnaamijyada tababarada ee ka jiri kara Buntland si loo helo saacado waxbarasho oo isku mid ah, koorsooyin isku mid iyo shahaadooyin mid ah.

- Afka Ingriiska ayaa lagu baranayaa dhammaan maadooyinka tababarka, wixii aan ka ahayn Diinta Islaamka iyo Carabiga oo af carabi lagu qaadanayo.
- Agabka waxbarashada iyo hanti ku filan waa in loo heli karaa barnaamijka tababarka

**Mushahaarooyinka, abaalmarinada iyo dallacaada**

Dawladda waxaa ka go'an shaqo badbaadin (job security), fursad waxbarasho oo sii socota, iyo u raaxayn dhanka maanka iyo muuqa ee dhammaan macallimiinta iyadoo aan loo eegayn qolo, jaad (gender) iyo diin intaba. Waxbarista ayaa laga dhigi karaa mid soo jiidasho leh haddii wax laga qabto jawiga guud ee shaqada, macallimiinta oo lagu xulayo imtixaano lagu tartamayo, dalacaad ku fadhida abaalmarin, hawlkarnimo wax lagu bixiyo, helitaanka tabaha casriga ee waxbarista iyo bixinta deeqo waxbarasho oo lagu helayo hawlkarnimo iyo u qalan cilmi. Waxaa intaas sii dheer:

- Heerarka mushahaarooyinka waa in lagu saleeyaa heerka nolosha markaas jira, iyo isla markaa heerka aqoonta, waayo aragnimada, iyo shaqada dheeraadka ah.
- Macallimiintu waxay helayaan dallacaad markay dhammaystaan saddex sano oo shaqo loo bogey ah.
- Aqoon-is-weydaarsiyo, fadhi hawleedyo iyo tababaro shaqada dhexdeeda ayaa lagama maarmaan u ah kor yeellidda shaqada waxbarista (teaching profession).
- Gunnooyin iidaha la bixiyo waa mid aad ay u dhiirigelinayso dawladdu si sare loogu qaado dhegta shaqada macallinamada.
- Waxaa la waafajinayaa sharciga fasax yo waxbarasho iyo fasaxyo mushahaar la'aan ah labadaba.
- Waxaa la magacaabi karaa maamule/maamule ku xigeen marka uu dhammaysto 3 sano oo waayo aragnimo macallinimo ah isla markaasna dhammaysato tababar maamul.

**G) Kordhinta ka qaybgalka gabdhaha ee barnaamijyada tababarada macallimiinta**

- Dawladda waxaa ka go'an inay ku dhiirigeliso gabdhaha barnaamjyada tababarada macallimiinta si ay ugu daydaan gabdhaha kale isla markaana u helaan jawi xasilooni ah oo la isku halayn karo.
- Waxbarasho lacag la'aan ah iyo deeqo waxbarasho ayaa loo raadinayaa gabdhaha ka yimid qoysas sabool ah iyo kuwa ku guulaysta dhibco sare.

- Fasaxa dhalidu wuxuu ugu yaraan noqonayaa 4 bilood oo mushahaarkiisa wata iyo weliba iyadoo tixgelin la siinayo muddada nuujinta.
- Dhismaha dugsiyo u gaar ah gabdhaha ayaa aad loo dhiirigelinayaa si loo shaqaaleeyo gabdho badan oo macallimiin ah, lana kordhiyo isqoridda gabdhaha.

**H) Arrimaha gudub u goynta ah (cross cutting issues)**

Siyaasadda dawladda waxaa weeyo in lagu daro maaddooyinka jira oo lagu tababarayo macallimiinta *lama huraanimada ilaalinta xuquuqda carruurta,kor qaadida waxbarashada nabadda, isu dheellitirka ragga iyo dumarka ( gender), waxbarashada degaanka, xirfadaha nolosha iyo ka hortagga cudurka dilaaga ah ee HIV/AIDS.*

**I) Maaraynta, maamulidda iyo hanti gelinta waxbarashada macallinka**

Siyaasadda dawladdu waxay ballan qaadaysaa:

- Machadyada tababarada macallimiinta ee sida gaarka ah loo leeyahay waxaa la bilaabi karaa oo keliya haddii ay ka soo baxaan shuruudaha ay u dejisey wasaarasdu isla markaana oggolaansho cad oo uu saxiixay wasiirka waxbarashadu ay ka haystaan wasaaradda.
- Wasaaradda waxbarashada ayaa masuul ka ah horumarinta manhajka machadyada tababarada macallimiinta, kormeerkiisa iyo hubinta tayada mashaariicada waxbarashada ka jirta meelahaas.
- Wasaaradda ayaa dejinaysa habmaamulada kulliyadaha iyo macaahidda waxbarashada macallimiinta.

- Dhammaan la wadaagayaasheena shaqada (partners) ee gudaha iyo kuwa dibeddaba waxaa la fartiimayaa inay raacaan barnaamijyada waxbarasshada iyo siyaasadaha macallimiinta u gaarka ah.
- Wasaaradda iyo hay'daha dawliga ah ee dhinca mashaariicda waxbarashada waa inay wada saxiixaan warqad is afgarad (memorandum of understanding) oo ku salaysan siyaasadeheeda intuusan kan dambe uusan wax hawl waxbarasho ah ka bilaabin Buntland.
- Looma oggola hayadaha dawliga inay u gudbiyaan dhinacyo kale wax xog oo ku saabsan habdhiska waxbarashada Buntland iyagoo aan wax oggolaansho ah ka haysan wasaaradda.

- Wasaaradda waxaa ka go'an inay hesho shaqaale karti sare u leh dhinaca maamulka iyo maaraynta maaliyadda.
- Kol haddaan si horusocod leh ugu noqonayno xaalad caadi ah, waxaa ka go'an dawladda inay kordhiso kaalmadeeda ku aadan waxbarasashada macallimiinta iyo mushahaarooyinkooda. Dawladdu waxaa kaloo ay aqoonsantahay isla markaan dhiirigelinaysaa dedaalka ay bixinayaan qaybaha gaarka ahi (private sector) si ay wax uga geystaan dhisida iyo joogteynta abaabulada waxbarashada (institutions). Dawladdu waxaa kale oo ay aqoonsantahay jagooyinka ay ka cayaarayaan hayadaha dawliga ah maalglinta waxbarashada, dhisidda iyo dayactirka laga soo bilaabo dagaalka dhammaadkiisa, iyadoo isla markaana ay ka go'an tahay inay isu- duwaan dhamaan mashaariicda waxbarashada ee socota.

### J) Aqoonsi Waxbarasho (Certification)

1. Macallimiinta dugsiayda gundhigga (asaasiga) ee tababar shaqo-ka-hor ku jira waxaa la guddoonsiinayaa dibloom macallinimo markay ku gudbaan carbiska waxbarista iyo imtixaanada kama dambaysta ah marka muddada barnaaminka oo labada sano ahi dhammaato.
2. Macallimiinta dugsiayda gundhigga (asaasiga) ee tababar shaqo-dhexdeeda( in-service) ku jira waxaa la siin doonaa aqoonsi waxbaris (Certificate) markay ku guulaystaan gudbidda carbiska tababarada iyo imtixaanada kama dambaysta ah ee barnaamijka SCOTT oo labada sano ah.

### K) Kormeerka Machadyada Tabarada Macallimiinta

Qaybta tababarada macalliminta ee hadda la sameeyey waxay masuul ka tahay qeexidda heer beegayaasha (standards) lagu oggolaan karo furidda macaahidda waxbarashada, dejinta qaababka qiimayntooda iyo kormeerkooda labadaba iyadoo raacaysa siyaasadaha wasaaradda. Qaytan cusubi waxay kaloo isu duwaysaa hawlaha la xiriira tababaridda macallimiinta iyo shaqo qoristooda. Waxay kale oo ay qeexaysaa heerbeegayaasha macallimiinta, tababarada iyo aqoonsi bixinta (certification). Waxaa kale oo xil ka saaran yahay kormeerid joogteysan, kaalmayntooda iyo hagidda bareyaasha iyo dusha ka eegida barnaamijyada tababarada macallimiinta ee shaqada-ka-hor iyo shaqada-dhexdeeda intaba.